# EXPEDITED CHILD SUPPORT PROCESS
# MOTION TO MODIFY CHILD SUPPORT
# *HABKA DADAJINTA MASARUUFKA CUNUGGA*
# *CODSIGA LAGU BADDALO MASARUUFKA CUNUGGA*

**USE CHILD SUPPORT FORMS FOR EXPEDITED PROCESS ONLY IF:**
***ISTICMAAL FOOMAMKA HABKA DADAJINTA MASARUUFKA CUNUGGA OO KELIYA HADDII*:**

(1) There is already an existing court order setting or reserving child support;
*Uu jiro ammar ka soo baxay maxkamadda oo dajiya ama gadaak y dguga masaruufka cunugga.*

(2) You are asking the court to change basic support, medical support, and/or child care, **and**
*Aad maxkamadda weydiisaneysid in ay wax ka baddasho masaruufka aasaasiga, gargaarka caafimaadka, iyo/ama xanaanada cunugga,* ***iyo***

(3) You and/or the other party receive public assistance or child support enforcement services (Title IV-D services) from the local child support enforcement agency.
*Adiga iyo/ama dhinaca kale aad kaalmada dadweynaha ama adeegyada hirgelinta masaruufka cunugga (adeegyada Qeybta IV-D) ka qaadataan wakaaladda hirgelinta masaruufka cunugga.*

**You cannot use child support forms for the expedited process to change spousal maintenance, parenting time, (visitation) or custody**
***Ma isticmaali kartid foomamka masaruufka cunugga xagga habka dadajinta si aad u baddashid taakuleynta xaaska, waqtiga waalidnimada, (booqashada) ama haynta***

New terms:
*Qodobo cusub:*

Joint child – is the dependent child of both parents in the support action.
*Cunugga idinka dhexeeyo - waa cunugga ku tiirsan labada waalid xagga masaruufka.*

Nonjoint child – is the legal child of one, but not both parents in the support action.
*Cunug aan ka dhexeynin - waa cunug sharci ahaan ku abtirsada hal waalid - kana dhexeynin labada waalid xagga masaruufka.*

- Court personnel, the county attorney's office, and the child support enforcement agency **cannot** help you fill out these forms.
  *Shaqaalaha maxkamadda, xafiiska xeer ilaaliyaha dagmada, iyo wakaaladda hirgelinta masaruufka cunugga* ***kuguma*** *kaalmeyn karaan buuxinta foomamkaan.*

- You may need to speak with a lawyer or other legal services provider if you do not know how to answer the questions on the forms.
  *Waxaa dhici karto in aad u baahatid in aad la hadashid qareen ama bixiyaha adeegyada sharciga kale haddii aadan aqoonin sida looga jawaabo su'aalaha ku saabsan foomamka.*

- You **must** fill out all forms listed in these instructions (the Motion to Modify Support, the Affidavit in Support of Motion to Modify, the Affidavit of Service, Form 11.1 (if necessary), and Form 11.2). All forms must be filed with the court
  ***Waa*** *in aad buuxisid dhamaan foomamka tilmaamahaan (Codsiga Baddalaadda Masaruufka, Warqadda Dhaarta ee lagu Taageero Codsiga Baddalaadda, Gaarsiinta Warqadda Dhaarta, Foomka 11.1 (haddii loo baahdo), iyo Foomka 11.2). Dhamaan foomamka waa in loo gudbiyo maxkammadd.*

- These forms must be served on the other party and the county attorney at least twenty (20) days before the hearing. **YOU CANNOT SERVE THE FORMS YOURSELF. YOU MUST HAVE SOMEONE ELSE OVER THE AGE OF 18 WHO IS NOT A PARTY TO THE CASE HAND DELIVER OR MAIL THE FORMS FOR YOU.**
  *Foomamkaan waa in loo gudbiyo dhinaca kale iyo xeer ilaaliyaha ugu yaraan labaatan (20) maalin ka hor inta aan la qabanin dhageysiga.* ***ADIGA MA GAARSIIN KARTID FOOMAMKA. WAA IN UU JIRO QOF KALE OO KA WEYN 18 SANNO OO AAN QEYB KA AHAYN KIISKA IN UU GACANTA KU GEEYO AMA UU BOOSTADA KUUGU DIRO FOOMAMKA.***

## GENERAL INFORMATION
## *MACLUUMAADKA GUUD*

When filling out the forms be as accurate and as detailed as possible. A court order for child support may be changed by showing that the current support order is unreasonable and unfair because of:
*Marka aad buuxineysid foomamka, hubso in aad sax tahay iyo in aad tafatirtid sida suurtogalka ah. Waa la baddali karaa ammarka maxkamadda ka soo saarto masaruufka cunugga marka la muujiyo in ammarka masaruufka iminka jira in uusan ahayn macquul iyo in uu yahay xaq darro maxaa yeelay:*

- Substantial change in the gross monthly income of a party;
  *Isbaddal la taaban karo ayaa ku dhacay dakhliga guud ahaan soo gala hal dhinac;*
- Substantial change in the need / expenses of a party or the joint child(ren);
  *Isbaddal la taaban karo ayaa ku dhacay baahida / kharashka hal dhinac ama cunugga (caruurta) ka dhexeyso;*
- Extraordinary medical expenses of the child not provided for under a health care plan;
  *Cunugga wuxuu la kulmay kharash caafimaad aan caadiga ahayn lagana helin qorsha daryeelka caafimaadka.*
- A change in health care coverage or a substantial change in the cost of existing health care coverage;
  *Waxaa isbaddalay ceymiska daryeelka caafimaadka ama waxaa si la taaban karo isu baddalay kharashka ceymiska daryeelka caafimaadka iminka jira:*
- A change in work-related or education-related child care expenses;
  *Waxaa isbaddalay kharashka xanaanada cunugga ee la xariira shaqada ama waxbarashada;*
- The emancipation of a child. Emancipation may occur by attaining the age of 18, graduating from high school, or joining the military;
  *Waxaa qaan gaaaray cunugga. Qaan gaarnimada waxay dhici kartaa marka la gaaro 18 sanno, marka laga qalin jebiyo dugsiga sare, ama marka lagu biiro ciidamada;*
- A change in the residence of the child(ren).
  *Waxaa isbaddalay meesha uu daggan yahay cunugga (caruurta).*

If you are now ordered to pay child support and are requesting support to be suspended because the child(ren) is/are living with you, you must provide proof. Examples of things that you can file with the court as proof are:
*Haddii iminka laguugu amro in aad bixisid masaruufka cunugga, aadna codsaneysid in lagaa joojiyo maxaa yeelay cunugga (caruurta) waxay kula nool yahiin adiga, waa in aad keentid caddeyn. Tusaalooyinka caddeynta aad u gudbin kartid maxkamadda waa:*

- a signed and notarized statement from the other party stating the child(ren) has changed residence
  *oraah laga soo saxiixay dhinaca kale lana soo mariyay notaayada taasoo sheegta in cunugga (caruurta) uu baddalay meesha uu daggan yahay*
- school records
  *diiwaanka dugsiga*
- day care records or medical records
  *diiwaanka xanaanada maalinta ama diiwaanka caafimaadka*

**INSTRUCTIONS**
***TILMAAMAHA***

**STEP 1**
**FILL OUT THE "NOTICE OF MOTION AND MOTION TO MODIFY CHILD SUPPORT" FORM**
***TALAABADA 1AAD:***
***BUUXI FOOMKA "OGEYSIISKA CODSIGA IYO CODSIGA LAGU BADDALO MASARUUFKA CUNUGGA"***

The information to fill in the boxes and blanks at the top of the form can be found at the top of your current child support order or your divorce or paternity decree, including:
*Macluumaadka lagu buuxiyo sanduuqyada iyo meelaha banaan ee ku yaal dhanka kore foomka waxaa laga heli karaa dhanka kore ammarka masaruufka cunugga ee iminka jira ama sharciga furitaankaada ama waalidnimada, waxaana ka mid ah:*

- The county where your case is located (which may be different from the county where you live). *Dagmada meesha laga helo kiiskaada (ee laga yaabo in ay ka duwan tahay dagmada aad ku nooshahay).*
- The number of the judicial district. *Nambarka maxkamadda dagamada.*
- The court file number. *Nambarka faylka maxkamadda.*
- The name of the Petitioner. *Magaca Codsadaha.*
- The name of the Respondent. *Magaca Eedeysanaha.*

If you are the Petitioner in the current order or decree you will be the Petitioner in this motion. If you are the Respondent in the current order or decree you will be the Respondent in this motion.
*Haddii aad tahay Codsadaha ammarka iminka jira ama sharciga, waxaad ahaan doontaa Codsadaha codsigaan. Haddii aad tahay Eedeysanaha ammarka iminka jira, waxaad ahaan doontaa Eedeysanaha codsigaan.*

Fill in the name and last known address of the other party and the name and address of the county attorney where your case is located. **DO NOT** fill in the date, time, and location of the hearing. You will fill in this information as part of Step 4 below.
*Buuxi magaca iyo cinwaanka la yaqaan, ugu dambeeyay, ee dhinaca kale iyo magaca iyo cinwaanka xeer ilaaliyaha meesha kiiskaada ku qoran yahay.* ***HA*** *BUUXININ taariikhda, waqtiga, iyo goobta dhageysiga. Waxaad buuxin doontaa macluumaadkaan bacdamaa ay qeyb ka yahiin Talaabada 4aad ee ku taal hoos.*

In the area marked "Motion", check off only the boxes that list the changes you are asking the court to make -- <u>you do not need to check off every box.</u> You may check off as many changes as you wish, but it will be up to the court to decide what changes will actually be ordered.
*Qeybta ku calaameysan "Codsi", calaamee sanduuqyada ku qoran baddalaadda aad weydiisaneysid maxkamadda oo keliya in ay samayso - <u>uma baahnid in aad calaameysid sanduuq kasta</u>. Waxaad calaameen kartaa baddalaad badan ilaa inta aad rabtid, hase ahatee maxkamadda ayaa go'aan ka gaari doonto baddalaadda dhab ahaan la amri doono.*

Fill in the name and phone number of the person to contact to settle this matter.
*Ku qor magaca iyo nambarka telefoonka qofka loo baahan yahay in lala xariiro si loo dhameeyo xaajadaan.*

**STEP 2**
**FILL OUT THE "AFFIDAVIT IN SUPPORT OF MOTION TO MODIFY CHILD SUPPORT" FORMS**

***TALAABADA 2AAD:***
***BUUXI FOOMAMKA "DHAARTA LAGU TAAGEERO CODSIGA BADDALAADDA MASARUUFKA CUNUGGA"***

Fill in the top of the form the same way you did on your "Notice of Motion and Motion" form.
*Buuxi dhanka kore foomka isla sida aad u buuxisay foomka "Ogeysiiska Codsiga iyo Codsiga".*

Fill in the information on the "Affidavit in Support of Motion".
*Buuxi macluumaadka ku yaal "Warqadda Dhaarta lagu Taageero Codsiga".*

**ONLY DATE AND SIGN YOUR "AFFIDAVIT IN SUPPORT OF MOTION" FORM WHEN YOU ARE IN FRONT OF A NOTARY PUBLIC OR THE COURT CLERK. MAKE SURE TO BRING PICTURE IDENTIFICATION TO SHOW TO THE NOTARY PUBLIC OR CLERK.** A Notary Public can usually be found at a bank and sometimes at the courthouse.
***SAXIIX KUNA QOR TAARIIKHDA OO KELIYA FOOMKA "WARQADDA DHAARTA LAGU TAAGEERO CODSIGA" ADIGA OO HOR TAAGAN NOTAAYADA DADWEYNAHA AMA KARAANIGA MAXKAMADDA. HUBSO IN AAD LA TIMAADID AQOONSIGA SAWIRKA SI AAD U TUSTID NOTAAYADA DADWEYNAHA AMA KARAANIGA.*** *Badanaa Notaayada Dadweynaha waxaa laga heli karaa bangigga iyo marmar waxaa laga heli karaa maxkmadda.*

Helpful materials may be found at your public county law library. For a directory, see http://mn.gov/law-library/research-links/county-law-libraries.jsp . For more information, contact your court administrator or call the Minnesota State Law Library at 651-296-2775.
*Waxyaabaha waxtarka leh waxaa laga heli karaa maktabka sharciga dadweynaha ee dagmadaada. Si aad u heshid liiska, fiiri* http://mn.gov/law-library/research-links/county-law-libraries.jsp *. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, la xariir maamulaha maxkamadda ama wac Maktabka Sharciga Gobolka Minnesota, telefoonka 651-296-2775.*

Gather documents that support your reasons why the child support order should be changed. Examples of these documents include the following:
*Soo aruuri warqadaha taageersan asbaabta loo baahan yahay in la baddalo ammarka masaruufka cunugga. Tusaalooyinka warqadahaan waxaa ka mid ah kuwa soo socda:*

- Proof of your gross income (recent pay stubs, employer statements, or statements of receipts and expenses if you are self-employed. Other documentation may include W-2 forms or copies of your tax returns for the most recent year
  *Caddeynta dakhligaada guud (dabada jeegagga ugu dambeyay, bayaanada loo-shaqeeyaha, ama bayaanada resiidyada iyo kharashka haddii aad tahay qof iskiisa u shaqeysto. Warqadaha kale waxaa ka mid ah foomamka W-2 ama koobiyada canshuur celintaada sannadkii ugu dambeyay.*
- Proof of unemployment/disability (lay-off notice, doctor's statement, etc.)
  *Caddeynta shaqo la'aanta/itaal darrida (ogeysiiska shaqo ka fadhiisinta, oraahda takhtarka, iwm.).*
- Verification for status of unemployment compensation claim or worker's compensation claim
  *Xaqiijinta sheegashada xaaladda magta shaqo la'aanta ama sheegashada magta shaqaalaha*

- Verification of receipt and amount of social security income
  *Xaqiijinta resiidka iyo qiyaasta dakhliga soshal sekuritiga*
- Verification of child care expenses
  *Xaqiijinta kharashka ku baxa daryeelka cunugga*
- Verification of the cost of health care and/or dental insurance coverage
  *Xaqiijinta kharashka daryeelka caafimaadka iyo/ama ceymiska ilkaha*

**STEP 3**
**FILL OUT THE "CONFIDENTIAL FINANCIAL SOURCE DOCUMENTS" FORM 11.2.**
**FILL OUT "CONFIDENTIAL INFORMATION " FORM 11.1 WHEN NECESSARY**

***TALAABADA 3AAD:***
***BUUXI FOOMKA 11.2 "WARQADAHA ILAHA MAALIYADDA QARSOODIGA"***
***BUUXI FOOMKA 11.1 "MACLUUMAADKA QARSOODIGA" MARKA LOO BAAHDO***

Certain information is considered confidential and not available to the public. To keep this information private and not available to the public, you must attach Form 11.2 to certain documents that contain confidential information. See Rule 11 of the Minnesota General Rules of Practice for more information. One Form 11.2 can be used for all documents containing confidential information. Examples of documents that have confidential information include:
*Macluumaadka qaar waxaa loo haystaa in ay yahiin qarsoodi iyo in dadweynaha aysan heli karin. Si macluumaadkaan gaar u ahaado una helin dadweynaha, waa in aad ku lifaaqdid Foomka 11.2 warqadaha qaar ee laga helo macluumaadka qarsoodiga. Fiiri sharciga 11 Sharciyada Dhaqanka Guud ee Minnesota (Minnesota General Rules of Practice) si aad u heshid macluumaad dheeraad ah. Hal Foomka 11.2 ayaa loo adeegsan karaa dhamaan warqadaha macluumaadka qarsoodiga. Tusaalooyinka warqadaha macluumaadka qarsoodiga waxaa ka mid ah:*

- Paycheck stubs, employer statements, W-2 forms, or business income and business expenses
  *Dabada jeegagga mushaarka, bayaanada loo-shaqeeyaha, foomamka W-2, ama dakhliga ganacsiga iyo kharashka ganacsiga*
- Copies of your tax returns and schedules
  *Koobiyada canshuur celintaada iyo jadwalada*
- Bank statements
  *Bayaanada Bangiga*
- Credit card statements
  *Bayaanada kaarka deynta*
- Check registers
  *Diiwaanada jeegga*

To protect your privacy, the other parties, and your child(ren), all social security numbers, employer identification numbers, and financial account numbers listed on papers you file with the court must be blackened out (crossed out) completely. Failure to do this means these numbers could be available to the general public and you could be charged court costs for the failure to keep your and the other party's social security number, employer identification number, and/or financial account numbers private. Use Form 11.1 to list any of these confidential numbers and file Form 11.1 with the court. **If these numbers are already on file with the court, you do not need to submit another Form 11.1.**
*Si loo badbaadiyo asturnaantaada, dhinacyada kale, iyo cunugga (caruurta), dhamaan nambarada soshal sekuritiga, nambarada aqoonsiga loo-shaqeeyaha, iyo nambarada xisaabta maaliyadda ee ku qoran warqadaha aad u soo gudbisid maxkamadda waa in si dhamaystiran loo madoobeeyo (xariiqan la mariyo). In aan tani la sameynin waxay la macno tahay in nambaradaan ay heli karaan dadweynaha guud iyo in laguugu soo dallici karo kharashka maxkamadda in aadan xajinin soshal sekuritigaada iyo tan dhinaca kale, nambarka shaqada loo-shaqeeyaha, iyo/ama nambarada*

*maaliyadda xisaabta. Isticmaal Foomka 11.1 si aad u qortid liiska nambaradaana qarsoodiga ah kaddibna maxkamadda u soo gudbi Foomka 11.1.* ***Haddii nambaradaan horay ugu jiraan faylka maxkamadda, looma baahna in aad mar kale soo gudbisid Foomka 11.1.***

## STEP 4
## OBTAIN A HEARING DATE, TIME, AND LOCATION FROM COURT ADMINISTRATION
## *TALAABADA 4AAD:*
## *WAXAAD TAARIIKHDA DHAGEYSIGA, WAQTIGA, IYO GOOBTA KA QABSATAA MAAMULKA MAXKAMADDA*

- Contact the court administrator's office in the county where your case is located. *La xariir xafiiska maamulaha maxkamadda dagmada meesha kiiskaada ka furan yahay.*

- Ask for a hearing date, time, location of the hearing, and the name of the child support magistrate or judge who will hear the matter. The hearing date must be at least 23 days away from the date the motion papers are mailed to the other party and the county attorney's office. Count the day after it is mailed as Day 1.
  *Weydiiso taariikhda, waqtiga, goobta dhageysiga, iyo magaca qaaliga ama garsooraha masaruufka cunugga ee dhageysan doono xaajada. Taariikhda dhageysiga waa in ay ahaato ugu yaraan 23 maalin laga bilaabo taariikhda warqadaha codsiga boostada loogu diro dhinaca kale iyo xafiiska xeer ilaaliyaha dagmada. Ku tiri maalinta ku xigta maalinta la diro in ay tahay Maalinta 1aad.*

- Fill in the date, time, and location of the hearing on the "Notice of Motion and Motion" form. *Buuxi taariikhda, waqtiga, iyo goobta lagu qaban doono dhageysiga kuna qor foomka "Ogeysiiska Codsiga iyo Codsiga" ("Notice of Motion and Motion")*

## STEP 5
## MAKE COPIES OF FORMS
## *TALAABADA 5AAD:*
## *KOOBIYO KA SAMEE FOOMAMKA*

- Make <u>three</u> copies of the completed "Notice of Motion and Motion" form, <u>three</u> copies of your "Affidavit in Support of Motion" form, and <u>three</u> copies of all other documents that support your motion (e.g. paycheck stubs, tax returns, proof of expenses). **Do not** make copies of Forms 11.2 or 11.1, unless you want copies for your own records.
  *<u>Saddax</u> koobi ka samee foomka "Ogeysiiska Codsiga iyo Codsiga", <u>saddax</u> koobi ka samee foomka "Warqadaada Dhaarta ee Taageersan Codsiga", iyo <u>saddax</u> koobi ka samee dhamaan warqadaha kale ee taageersan codsigaada (tusaale ahaan, dabada jeegagga mushaarka, canshuur celinta, caddeynta kharashka). Koobi* ***ha*** *ka samaynin Foomamka 11.2 ama 11.1 haddii aadan koobiyada u rabin diiwaankaada.*

- Keep one copy of each form and one copy of all supporting documents for yourself (remember to bring your copies with you to court on the day of your hearing).
  *Haayso hal koobi foom kasta iyo hal koobi dhamaan warqadaha taageersan naftaada (xasuuso in aad keentid koobiyadaada maxkamadda maalinta dhageysigaada).*

## STEP 6
## HAVE COPIES OF THE FORMS AND SUPPORTING DOCUMENTS SERVED ON THE OTHER PARTY AND COUNTY ATTORNEY'S OFFICE

## *TALAABADA 6AAD:*
## *HAAYSO KOOBIYADA FOOMAMKA IYO WARQADAHA TAAGEERSAN EE LA GAARSIIYAY DHINACA KALE IYO XAFIISKA XEER ILAALIYAHA*

You must arrange for the other party and the county attorney's office to receive complete copies of all forms and supporting documents you have prepared for the hearing. This is called "service of process." A copy of the motion, affidavits, and any supporting documents must be served upon all parties, either personally or by mail. If a party is represented by an attorney, the forms and supporting documents must be served on the attorney instead of the party.
*Waa in aad qorsheysid in aad dhinaca kale iyo xafiiska xeer ilaaliyaha gaarsiisid koobiyo dhamaystiran oo ku saabsan dhamaan foomamka iyo warqadaha taageersan oo aad u diyaarsatay dhageysiga. Tani waxaa lagu magacaabaa "gaarsiinta hawsha" ("service of process"). Waa in koobiga codsiga, warqadaha dhaarta, iyo warqadaha taageerada la gaarsiiyo dhamaan dhainacyada, qof ahaan ama waa in loogu diro boostada. Haddii qareen mattalo dhinac, foomamka iyo warqadaha taageersan waa in la gaarsiiyo qareenka baddalkii dhinaca.*

Personal service: forms and supporting documents are hand delivered to the other party personally or by leaving them at that party's place of residence with some person who is of suitable age or discretion who also lives at the same residence. Forms and supporting documents must be hand delivered <u>at least 20 days before the hearing date.</u>
*Marka qof ahaan la gaarsiiyo: foomamka iyo warqadaha taageersan waxaa gacanta loogu geeyaa dhinaca kale, qof ahaan ama waxaa lagu dhaafa qof kale oo da' ah, sharaf leh kuna nool isla guriga uu daggan ayahay dhinaca kale. Foomamka iyo warqadaha taageersan waa in gacanta lagu geeyo <u>ugu yaraan 20 maalin ka hor inta aan la gaarin taariikhda dhageysiga</u>.*

Mail service: forms and supporting documents are mailed by first class U.S. mail to the other party and the county attorney's office <u>at least 23 days before the hearing date.</u>
*Adeegga boostada: foomamka iyo warqadaha taageersan waxaa boostada U.S. loogu diraa dhinaca kale iyo xafiiska xeer ilaaliyaha dagmada <u>ugu yaraan 23 maalin ka hor inta aan la gaarin taariikhda dhageysiga</u>.*

**If your forms and supporting documents are not timely served upon the other party (or his/her attorney) and the county attorney's office <u>your motion may not be heard by the court.</u>**
***Haddii foomamkaada iyo warqadahaada taageersan aan waqtigii ku habbonaa loo gudbinin dhinaca kale (ama qareenkiisa/qareenkeeda) iyo xafiiska xeer ilaaliyaha dagmada waxaa dhici karto in <u>maxkamadda aysan dhageysanin codsigaada</u>.***

**NOTE!** **<u>YOU CANNOT</u> HAND DELIVER OR MAIL THE DOCUMENTS YOURSELF. YOU <u>MUST</u> HAVE SOMEONE ELSE OVER THE AGE OF 18 WHO IS NOT A PARTY TO THE CASE HAND DELIVER OR MAIL THE DOCUMENTS FOR YOU.**
***XASUUSIN!*** ***ADIGA GACANTA <u>KUMA GEYN</u> KARTID WARQADAHA AMA KUMA DIRI KARTID BOOSTADA ADIGA NAFTAAADA. <u>WAA</u> IN UU JIRO QOF KALE OO KA WEYN 18 SANNO OO AAN QEYB KA AHAYN KIISKA IN UU GACANTA KU GEEYO WARQADAHA AMA UU BOOSTADA KUUGU DIRO.***

**STEP 7**
**COMPLETE THE "AFFIDAVIT OF SERVICE" FORM**

***TALAABADA 7AAD:***
***DHAMAYSTIR FOOMKA "GAARSIINTA DHAARTA" (AFFIDAVIT OF SERVICE)***

The person who hand delivers or mails the forms and supporting documents must fill out an "Affidavit of Service" form for each party served.
*Qofka gacanta ku geeya ama boostada ku dira foomamka iyo warqadaha taageerada waa in uu dhinac kasta oo loo gudbiyo ka buuxiyo foomka "Gudbinta Warqadda Dhaarta".*

**NOTE!** **THE PERSON WHO HAND DELIVERS OR MAILS THE FORMS AND SUPPORTING DOCUMENTS <u>MUST SIGN</u> THE "AFFIDAVIT OF SERVICE" IN FRONT OF A NOTARY PUBLIC OR A COURT CLERK. MAKE SURE THE PERSON BRINGS PICTURE IDENTIFICATION TO SHOW TO THE NOTARY PUBLIC OR CLERK.**

***XASUUSIN!*** ***QOFKA GACANTA KU GEEYA AMA BOOSTADA KU DIRA FOOMAMKA IYO WARQADAHA TAAGEERSAN <u>WAA IN UU SAXIIXO</u> "GUDBINTA WARQADDA DHAARTA" KUNA SAXIIXO NOTAAYADA DADWEYNAHA HORTEEDA AMA KARAANIGA MAXKAMADDA HORTIISA. HUBSO IN QOFKA UU LA YIMAADO SAWIRKA AQOONSIGA SI UU U TUSO NOTAAYADA DADWEYNAHA AMA KARAANIGA.***

**STEP 8**
**FILE THE FORMS AND SUPPORTING DOCUMENTS WITH COURT ADMINISTRATION AND PAY ANY REQUIRED COURT FEE**

***TALAABADA 8AAD:***
***WAXAAD MAAMULKA MAXKAMADDA U SOO GUDBISAA FOOMAMKA IYO WARQADAHA TAAGEERSAN IYO BIXI KHIDMADAHA MAXKAMADDA U BAAHAN TAHAY***

File the **original forms** and supporting documents with court administration in the county where your case is located as soon as practical but no later than 5 days before the scheduled hearing.
*Waxaad **foomamka asalka** iyo warqadaha taageersan u soo gudbisaa maamulka maxkamadda dagmada meesha kiiskaada ka socdo sida ugu dhakhsiyaha badan ee la samayn karo balse waa in aysan ka dambeynin 5 maalin ka hor inta aan la qabanin dhageysiga la ballamiyay.*

- The <u>original</u> "Notice of Motion and Motion to Modify Child Support"
  *<u>Asalka</u> "Ogeysiiska Codsiga iyo Codsiga Baddalaadda Masaruufka Cunugga"*
- The <u>original</u> "Affidavit in Support of Motion to Modify Child Support"
  *<u>Asalka</u> "Warqadda Dhaarta Taageerada Codsiga Baddalaadda Masaruufka Cunugga"*
- The "Affidavit of Service"
  *"Gaarsiinta Warqadda Dhaarta"*

Don't forget to file the Affidavit of Service as that is proof to the court when your documents were served on the other parties.
*Ha iloobin in aad soo gudbisid Gaarsiinta Warqadda Dhaarta bacdaamaa ay caddeyn u tahay maxkamadda marka warqadahaada la gaarsiiyay dhanacyada kale.*

<u>**Form 11.2**</u>

***Foomka 11.2***

You must file copies of all supporting documents (such pay stubs, employer statements, tax returns, verification of medical/dental insurance costs or expenses, child care expenses, disability payments) and attach one Form 11.2 to supporting documents that contain confidential information (see Step 3). Be certain to blacken out all social security numbers and financial account numbers that appear on any other document not under cover of Form 11.2. Check your documents to make sure all blanks are filled in, especially on the Affidavit of Service and the motion. All papers served must be identical copies of the original forms and supporting documents filed with the court.

*Waa in aad soo gudbisid dhamaan warqadaha taageersan (sida dabada jeegagga, bayaanada loo-shaqeeyaha, canshuur celinta, xaqiijinta kharashka ceymiska caafimaadka/ilkaha, kharashka ku baxa xanaanada cunugga, lacagaha itaal darrida) kuna soo lifaaqdid hal Foomka 11.2 warqadaha taageersan ee laga helo macluumaadka qarsoodiga (fiiri Talaabada 3aad). Hubso in aad madoobeysid dhamaan nambarada soshal sekuritiga iyo nambarada xisaabta maaliyadda ee ka muuqda warqad kasta oo kale ee aan hoos imaanin Foomka 11.2. Hubso warqadahaada si aad u hubsatid in aad buuxisay dhamaan meelaha banaan, khaas ahaa Gudbinta Warqadda Dhaarta iyo codsiga. Dhamaan warqadaha waa in ay ahaadan koobiyo isla mid ah oo laga sameyay foomamka asalka iyo warqqadaha taageersan ee loo gudbiyay maxkamadda.*

Court Fees

*Tasas del tribunal*

Pay the $100 modification fee at the time you file this motion. If you did not pay an initial filing fee when this case first began, you will be asked by court administration to pay the initial filing fee and library fees as well as the $100 modification fee before your motion can be heard by the court. Court administration will be able to tell you if you have paid the initial filing fee.

*Khidmadaha Maxkamadda*

*Bixi $100 oo ah khidmadda baddaalaadda marka aad gudbineysid codsigaan. Haddii aadan bixinin khidmadda gaarsiinta marka kowaad uu kiiskaan bilowday, maamulka maxkamadda wuxuu ku weydiin doonaa in aad bixisid khidmadda soo gudbinta hore iyo $100 oo ah khidmadda baddalaadda ka hor inta maxkamadda aysan dhageysanin codsigaada. Maamulka maxkamadda wuxuu awood u yeelan doonaa in uu kuu sheego haddii aad bixisay khidmadda gudbinta faylka hore.*

If you cannot afford to pay the fee, you may qualify to have the filing fee and motion fee waived by the court. You need to fill out Fee Waiver (In Forma Pauperis) application (available from court administration or the court website at www.mncourts.gov/forms) and file it with court administration. Your application will be reviewed by a child support magistrate or judge who will decide whether you must pay the fee. If the magistrate or judge does not sign an order that waives the fee, you must be prepared to pay the fee.

*Haddii aadan awoodin in aad bixisid khidmadda, waxaad xaq u yeelan kartaa in lagaa dhaafo khidmadda gudbinta iyo khidmadda codsiga ee maxkamadda. Waxaad u baahan tahayu in aad buuxisid arjiga Ka Dhaafidda Khidmadda (In Forma Pauperis) (lagana helo maamulka maxkamadda ama bogga internetka maxkamadda www.mncourts.gov/forms) kaddibna u soo gudbisid maamulka maxkamadda. Arjigaada waxaa fiirin doono qaaliga masaruufka cunugga ama garsoore ayaa go'aan ka gaara haddii loo baahan yahay in aad bixisid khidmadda. Haddii qaaliga ama garsooraha uusan saxiixin ammarka ka dhaafidda khidmadda, waa in aad diyaar u ahaatid in aad bixisid khidmadda.*

**STEP 9**

APPEAR AT THE HEARING

***TALAABADA 9AAD:***

***KAALAY DHAGEYSIGA***

Come to court on the date and time scheduled for the hearing. Be sure to bring with you your copy of the "Motion to Modify Child Support," "Affidavit in Support of Motion to Modify Child Support," and all of your supporting documents. You must bring enough copies of any supporting documents not already filed with the court nor served on all the parties so that copies can be given to all parties and the court.

*Kaalay maxkamadda taariikhda iyo waqtiga loo qabtay dhageysiga. Hubso in aad soo qaadatid koobigaada "Codsiga Baddalaadda Masaruufka Cunugga," "Warqadda Dhaarta ee Taageersan Codsiga Baddalaadda Masaruufka Cunugga," iyo dhamaan warqadahaada taageersan. Waa in aad keentid koobiyo ku filan oo ku saabsan warqadaha taageersan oo aan horay loo gudbinin maxkamadda iyo dhamaan dhinacyada si koobiyo loo siiyo dhamaan dhinacyada iyo maxkamadda.*